

# LA SOCO FIRE DANGER RATING OGSOONOWNA WIXII LA SAMAYNAYO.

Fire Danger Rating-ku saadaaliyaa sida dabku u soconayo haddii uu bilawdo, iyo weliba sida ay u adag tahay in la damiyo.

Marka heerku sii kordhaba, xaalladu way sii adkaanaysaa. Heerku waa in uu ahaadaa kan xakuma waxaad samayn lahayd, sidaas darteed si aad u nabad gasho ogsoonow heerka Fire Danger Rating ee halka aad ku nooshahay.

Inta uu socdo xilliga dabku, Fire Danger Rating-ku wuxuu ku saabsanaan doonaa saadaasha hawada, in laga sii daayo raadiyaha iyo telefishanka, iyo in uu ka muuqdo jaraaidada qaarkood.

Waxaa kaloo laga helli karaa websaytyada CFA, Department of Sustainability and Environment iyo Bureau of Meteorology, adigoo wacaya Victorian Bushfire Information Line tel 1800 240 667 ama National Relay Service tel: 1800 555 677.



## WAA MAXAY MACNEHEEDU?

### CODE RED

- Kuwaani waa xaalladaha ugu xun dabka kaymaha (bush) ama dabka cawska (grassfire).
- Guryuhu uma dhisna ama looguma tala gelin inay u adkaystaan xaalladahaan.
- Meesha ugu amaansani waa meesha ka fog khatarta goobaha dabka kaymaha (bushfire) jiro.

### EXTREME

- Filo xaallad hawo oo aad iyo aad u kulul, qalalan oo dabayl leh.
- Haddii dabku bilawdo oo xoogaysto, lama xakamayn karo, lama malayn karo waana dheereeyaa. Dab goobeed ayaa bilawdo, xoog ku socda jahooyin badana ka yimaada.
- Guryaha ku yaalla ama laga dhisay ama loo qaabeeyey inay u adkaystaan dabka (bushfire), kuwaas oo aad loo diyaariyey si adagna loo difaacay, ayaa laga yaabaa inuu difaac bixin karo.
- Waa inaad qalab ahaan iyo maskax ahaanba diyaar u tahay inaad difaacdo xaalladahaan.

### SEVERE

- Filo kulayl, qalayl iyo in dabayli dhici karto.
- Haddii dab bilawdo oo xoogaysto, waxa laga yaabaa in aan la xakamayn karin.
- Guryaha aadka loo diyaariyey ayaa ku siin kara amaan.
- Waa inaad qalab ahaan iyo maskax ahaanba diyaar u tahay inaad difaacdo.

### VERY HIGH

- Haddii dab bilawdo, waxay aad ugu badan tahay in la xakameeyo xaalladaha badankood.

### HIGH

- La soco sida dababku u bilaaban karaan yarayna khatarta.

### LOW-MODERATE

- Gubashada xakamaysani waxay ku iman kartaa xaalladahaan haddii ay amaan tahay – hubi haddii ogolaanshuhu khuseeyo.

## MAXAAN SAMAYNAYAA?

- Inaad ka tagto meelaha khatarta dabku (bushfire) ku sarayso habeenka ka horreeya maalinta dabku dhacayo ayaa ah xalka ugu fiican - ha sugin si aad u aragto.
- Ka fogow dhulka kaymaha, jiqda ama leh cawska dhaadheer oo qalalan.
- Ogsoonow xalka kuugu dambeeya – qaado go'aan ku saabsan:
  - markaad baxayso
  - meeshaad aadayso
  - waxaad raacayso
  - markaad soo noqonayso
  - waxaad samaynayso haddii aadan bixi Karin.

- Ka feker inaad gurigaaga joogto haddii aad si fiican u diyaarsan tahay. Taas macneheedu waa gurigaagu waa inuu u yaallaa kana dhisan yahay ama loo qaabeeyey hab adkaysta dabka (bushfire), aad diyaar u tahay aadna si firfircoon u difaaci kartaa haddii dab bilawdo.
- Haddii aadan aad u diyaarsanayn ilaa heerka ugu sarreeya, ka tegida goobaha leh khatarta sarre ee dabka (bushfire) maalinta hore ayaa ah xalka ugu fiican.
- La soco xaallada hawada agagaarka. Raadi macluumaadka adiga oo dhegaysanaya raadiyaha agtaada ah ee ABC, raadiyayaasha ganacsiga ah iyo maxadooyinka raadiyaha ee loo qoondeeyey, ama daawo Sky News TV, booqo [cfa.vic.gov.au](http://cfa.vic.gov.au), wacna Victorian Bushfire Information Line tel **1800 240 667** ama National Relay Service tel **1800 555 677**.

- Guryaha aadka loo diyaariyey ayaa bixin kara amaan – hubi qorshaha ka dabka (Bushfire Survival Plan).
- Haddii aadan diyaarsanayn, ka bixida meelaha dabka (bushfire-prone) u nugul maalinta dabka ka horaysa ayaa ah xalka ugu fiican.
- La soco xaallada hawada agagaarka. Raadi macluumaadka adiga oo dhegaysanaya raadiyaha agtaada ah ee ABC, raadiyayaasha ganacsiga ah iyo maxadooyinka raadiyaha ee loo qoondeeyey, ama daawo Sky News TV, booqo [cfa.vic.gov.au](http://cfa.vic.gov.au), wacna Victorian Bushfire Information Line tel **1800 240 667** ama National Relay Service tel **1800 555 677**.

- Hubi tusaha ka badbaadida dabka kaymaha (Bushfire Survival Plan).

- La socoshada xaallada.
- Wax aa laga yaabaa in xal loo baahan yahay.
- Ka bax haddii ay muhiim tahay.